

Martigelinta isdiwaan galinta

Sannad dugsiyeedka 2026/2027, isdiwaangelinta Dugsiga hoose iyo Dugsiyada baahiyaha gaarka ah waxay u dhici doontaa laba qaybood:

1. Qaybta koowaad ee diwaangelintu - Nofembar 2026

Qaybta koowaad ee diwaangelintu waxa ay ka dhacaysaa 9ka ilaa 20ka Nofembar 2026 dhamaan Dugsiyada hoose iyo kuwa baahiyaha gaarka ah ee Aasaasiga ah amaba gaarka loo leeyahay lehse manhaj lamid ah kan Aasaasiga ah **ballan Tellefoon kadib**. mase aha dugsiyada gaarka loo leeyahay lehna Nidaam dalladeed oo ukhaas ah. Isdiwaangelinta waxaa la ogolyahay in laga sameeyo **hal** Dugsi ookeliya, **taasna macnaheeduse ma'aha damaanad qaadka boos dugsiyaad** ee isla Dugsigan.

qabta koowaad oo isdiwaangalanita intay socoto waxaa la ururiyaa Xogta Ardayda cusub iyo baahida Daryeelka/Xannaanynta Galabnimo oo ardayda..

Markaad ballanta isdiwaangelinta qabsanayso, Hubso/Cadayso in uu ilmahaagu ka qayb qaadan doono qaybta koowaad ee isdiwaangelinta.

Haddii ilmahaagu uu yahay Naafo/baahiyo gaarka amaba uu qabo Xanuun/Jirro uu lanool yahay, waa inaad taas sheegta marka aad isdiwaangelinayso waana in aad keento wixii warbixinnada caafimaad ee la xidhiidha.

2. Qiimaynta- u bsilaanshaha Dugsiga hoose - Febraayo 2027

Boosta ahaan ayaa lagugu soo wargelin doonaa waxiiba ku saabsan goob dugsiyeedka loo qoondeeyay/dooray ilmahaaga ilaa iyo billowga Bisha Febraayo. Warqadan waxaa lagu weydiin doonaa qaybta 2aad ee isdiwaangelinta, waana inaad ballan la sameysato maamulka dugsiga lagu qoray Ilmahaaga, ujeedaduna waa si loo habsado ubislaanshaha dugsiga iyo qiimeynta heerka luqadda. **Mar'kan Waa inaad Ilmahaaga ballantan usoo kaxaysato.**

Waxaad ka heli kartaa dulmar ku saabsan dugsiyada Vienna hagaha dugsiga Vienna iyo Bogga internetka <http://schulfuehrer.bildung-wien.gv.at>

Dalbashada/isdiwaangelinta Xarun xanaaneedka Dugsiga waxay dhacaysa, 30ka Marso ilaa iyo 16ka April 2027. waxaadna Ilmahaaga ka diwaangelin kartaa BOGGA INTERNETKA ee <https://www.wien.gv.at/amswege/anmeldung-staedtischer-hortplatz>

Warbixinta helitaanka booska ee xarunta daryeelka Dugsiga kadib ahi waxay imanaysaa Bisha May 2027..

Isdiwaangelinta Goob xannaaneed khaas/Gaarka/Privat loo leeyahay waxay toos uga dhacaysaa isla xarunta aad dooratay dhexdeeda.

Marka la isdiiwaangelinayo bisha Nofembar, waa in Dukumeentiyada soo socda la soo gudbiyo:

- a. **Waraqadda deganaansha:** Martigalinta diiwaangelinta ardayga(qoraalkan iyo waraqada diiwaangelinta la socota oo aad soo buuxisay) **amaba** warqad dagganaansho oo wakhtigan xaadirka ah **amaba** Cadayn rasmi ah oo cadaynaysa deegaanka rasmiga ah (waxaana loogu talagalay caruurta degan agagaarka Viena)
- b. **Shahaadada Dhalasha** ilmaha
- c. Dokumenti cadaynaya **jinsiyada ilmaha**(sida baasborka)
- d. Cadaynta **Lamabrka Caymiska Cafimaadka ilmaha** (Kaarka Caafimaadka/**e-card**)
- e. Xaqiijinta shaqada/ waxbarashada, hadaad u baahantahay xannaano galabtii ah.
- f. Cadaynta Xannaanada carruurta ee uu ilmahagu hadda tegayey.(haday jiraan)
- g. Warbixinada Caafimaad haduu ilmaha xanuun qabo ama baahi gaar ah leeyahay.

Tilmaamo gaar ahaaneed:

Shuruudaha Sharciga ah ee qoondaynta boosaska Dugsiyada lagu bixiyo: Mabda' ahaan, doorashada Dugisyadu kama jirto Viennna. Hase ahaatee, haddii Carruur badan laga diiwaangeliyo Dugsi, Boosasna looga heli karin, Waxaa waajib ah in Ardayda cusub Gudoonka waxbarashadu si waafaqsan shuruudaha sharciga ah u qaybiyo. Shuruuduhuna waa:

- Carruurta walaalaha ah ee horay Dugsiga Ujooga
- Tixgelinta Waddada Dugsiga/Udhawaanshaha Guriga
- Inta uu qaadi karo Fassalku
- Hab nidaameedka Dugsiga Uyaal, sida(DAryeelka baahiyaha gaarka ah, campus, iwm.)

Daryeelka maalinta oo dhan: Xannaanada galabnimo laguma bixiyo dugsi kasta. Sidaasi daraadeed Waa in aad sheegtaa/codsataa nooca taageero/Cawimeed ee aad door bidayso/dooraysid. Waxaana lagu tixgelin doonaa sidii codsigan loo kala hormarin lahaa. Iyadoo la tixgalinayo/raacayo shuruudaha sharciga ah, Agaasinka waxbarashadu wuxuu sidoo kale ku meelayn karaa dugsi kale oo leh nooc daryeel oo ka duwan daryeelka galabnimo ee la door bidayo. . Dugsiyada aan lahayn xannaano maalmeedka, waxaa la tagi karaa xarumaha daryeelka guud amaba kuwa gaarka ah ee gelinka dambe.

Doorashada labaad: Haddii ay dhacdo in ku meelaynta dugsiga aad dooratay ay suurto gal noqon weydo sababo sharci ah awgood, waxaad haysataa doorasho labaad. Fadlan ogowse waa in shuruudaha sharciga ah loo hogaansamo. fadlan ogow, codsigan labaad xitaa, majirto wax damaanad qaad ah oo sheegaya helitaanka dugsiga. Doorashada Dugsi labaadina wax saamayn ah kuma yeelanayso qoondaynta dugsiga la doortay.

Diiwangelinta **caruurta baahiyaha gaarka ah** waxaa laga samayn karaa dugsiyada hoose amaba dugsiyada u gaarka ah ee loogu tala galay caruurta daryeelka gaarka ah u baahan. Haddii ilmahaagu u baahan yahay daryeel waxbarasho oo gaar ah, meelaynta dugsiga waa la bedeli karaa wakhti dambe xitaa. Haddii aad wax su'aalo ah qabtidna, fadlan kala xidhiidh Adeegga La-talinta khaaska ah ee Gudoonka Waxbarashada Vienna inklusion@bildung-wien.gv.at.

Go'aaminta ubislaanshaha Waxbarasho: ballanta go'aaminta u-diyaargarowga dugsiga, ayaa kooxda dugsigu waxay Go'aaminayaan, haduu ilmahaaga awoodi karo lasocoshada Casharrada Heerka koowaad isagoon culays jidh ahaan iyo maskax ahaanba korin. Haddii kale, Ilmahaas waa in lagu qiimeeyo in uusan gaadhin/ubislaan Waxbarashada loona wareejiyo fasalka Diyaar-garowga dugsiga. ardayga la doonayo in da'a yari laga diiwaangaliyo dugsiga, waa in sidoo kale la hubiyaa in ilmuhu uu leeyahay awood la dhaqanka Bulshada si uu u galo fasalka koowaad. Haddii kale, codsiga waa in la diidaa (§§ 6 iyo 7 ee sharciga waxbarashada khasabka ah).

Dukumeentiyada, sahanada iyo natiijooyinka, la ururiyay inta uu ilmuhu ku jiray xannaanada si loo diiwaangeliyo heerka horumarka, gaar ahaan heerka luqadda, waa in ay soo bandhigaan mas'uuliyiinta sharciga ah (§6 SchPflG).

Hubsashada Luuqadda Jarmalka: Marka lays qorayo ayaa la hubsadaa aqoonta luuqada Jarmalka. Dhamaan CARuurta aan luuqadda sifiican u **aqoonin amaba aan kuhadlin/fahmina karin**, waa in intixaanka (MIKA-D) ee heerka luuqada ardayga lagu qiimeeyo uu maro.

Waajib- Wargalin: Haddii ilmahaaga loo qoondeeyo dugsi ku yaal Vienna, laakiin ka hor inta uusan dugsigu bilaaban aad adreska badalato/ka guurto Vienna, waa inaad la xiriirtaa maamulka waxbarashada Vienna Qaybta Präs/6 oo aad wargalisa. schulplatz@bildung-wien.gv.at

Hubsashada Ubislaanshaha Dugisga iyo tan **Aqoonta Jarmalkuba** waa lagama maarmaan, xitaa haddii aad doonaysid in aad ilmahaaga guriga wax ku bartid, amaba in ay tagaan dugsi khaas ah oo aanan ku socon habka waxbarasha waddankan ama aadba doonaysid in uu dibadda waxbarasho u tago. Ballanta isqoridda ee dugsiyadu waa **mid khasab ah** in aad oofiso/timaado. Mana dhici karto in DARYaalka ilmo gaadhay wakhtiga waxbarashada aasaasiga ah oo aad guriga wax ku baridoontidi,uu ka dhaco goobaha xannaanada caruurta ee degmada Fiyeena.

Haddii aad damacsantahay in aad ilmahaaga **ka qorto dugsi dalka dibaddisa ah**, fadlan kula xidhiidh qoraal ahaan (amaba E-Mail ahaan: sia@bildung-wien.gv.at) qaybta waxbarashada Vienna u qaabilsan ardayda dibadda waxkabarata. Taasina waa mid aan lagu xidhayn in uu ilmahaagu Austeriyaan yahay amaba uu san ahayn.

Bilawga waxbarashada Assaasiga ah sida ku cad Buuga hooyada iyo Dhallaanka

Mas'uuliyiinta sharciga ahi waxay haystaan Doorasho ah inay isticmaalaan taariikhda dhalashada oona loo xisaabinayo sida ku cad Buuga hooyada iyo dhallaanka beddelka taariikhda dhalashada si loo go'aamiyo bilowga ka qayqaadashada Dugsiga Aasaasiga ah. Codsiguna waa mid qaybka ah isdiiwaangelinta bisha Nofembar lasoo gudbiyo .

Ugu horayn **dhamaadka wakhtiga Xannaanada caruurtata** ee Ilmahaaga ayaa waxaad ka helaysaa Xarunta Xannaanada Caruurta Warqadda wareejinta ee warbixinta Aqoonta luqadda DaE/DaZ. waana in aad ku wareejiso Macallinka Fasalka Ilmahaaga inta lagu guda jiro Asbuuca dugsiga ugu horreeya.Haddii aadan gayn Warqaddan, sida qawaaniinta Maamul Dugsiyeedka lagasoo xigtay waxaa loo fasaxay Maamulka dugsiga si waafaqsan Sharciga Dukumentiyada Waxbarashada in ay warqadda wareejinta ka helayaan Xarunta Xannaanada Caruurta.

Fadlan Ogsoonow, Sabab la'aan in looga maqnaado Isdiiwangalinta Dugsiga waxay ka dhigantahay Dembi Maamul oo waafaqsan ku xadgudubka qodob kamid ah sharciyada waxbarashada aasaasiga ah ee §24 Abs.4 waxaana lagu ganaaxayaa Ganaax Lacageed oo qiimahiisu gaadhayo 150€ illaa iyo 800€.

Haddi uu ilmahaagu Dugsiga bilaabay/tegey sannad dugsiyeedka 2026/2027 waxaa lagaa codsanaya in aad qoraalkan u gudbisoo maamulka dugsiga.

Die Unterlagen in weiteren Sprachen finden Sie unter/ further translations of these documents can be found online, here:

<https://www.sfz-wien.at/elmig/elmig-downloads>

¹ Übergabebblatt Sprachentwicklung DaE/DaZ (*Deutsch als Erstsprache/Deutsch als Zweitsprache*) vgl.

<https://www.bmbwf.gv.at/Themen/ep/sf.html#ueb>

¹ BGBl I Nr. 86/2019, ausgegeben am 31.7.2019, Artikel 5 vgl.

https://www.ris.bka.gv.at/Dokumente/BgblAuth/BGBLA_2019_I_86/BGBLA_2019_I_86.html